QODOBADA RASMIGA AH EE KULANKA FOGAAN ARAGA AH EE GUDDIGA DUGSIYADA BOSTON

Luuliyo 26, 2023

Guddiga Dugsiyada Boston waxay kulan fogaan arag ah ku yeesheen aaladda Zoom Luuliyo 26, 2023 abaare 6 p.m. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah shayada hoos ku taxan, booqo www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee, iimayl ugu dir feedback@bostonpublicschools.org ama ka wac Xafiiska Guddida Dugsiyada Boston (617) 635-9014.

KA SOO QEYBGALAYAASHA

Xubnaha Guddiga Dugsiga ee soo xaadiray: Gudoomiye Jeri Robinson; Ku Xigeenka Gudoomiyaha Michael D. O'Neill; Stephen Alkins; Rafaela Polanco Garcia; Quoc Tran; iyo Madaxa Ardayda Diego Mehta.

Xubinta Guddiga Dugsiga oo Maqan: Brandon Cardet-Hernandez.

DHUKUMIINTIYADA LASOO BANDHIGAY

Ajandaha

Warqad Ogaysiis: Qiimaynta shakhi ahaaneed ee Sanad Dugsiyseedka 2022-23 ee Kormeeraha Guud

Qiimaynta shakhi ahaaneed ee Kormeeraha Guud Skipper SY 2022-2023

PowerPoint: Qiimaynta shakhi ahaaneed ee Kormeeraha Guud Skipper SY 2022-2023

FURITAANKA KULANKA

Gudoomiye Jeri Robinson ayaa shirka furay oo hormuud u noqday ballan qaadka. Marwo Sullivan ayaa dadka yeerisay. Mudane Cardet-Hernandez wuu maqnaa. Dhammaan xubnaha kale ayaa joogay.

Marwo Robinson ayaa sheegtay in kulanka caawa si toos ah looga daawanayay Zoom. Waxaa dib looga sii dayn doonaa telefeeshinka Magaalada Boston. Waxaa lasoo dhigi doonaa bostonpublicschools.org/schoolcommittee iyo YouTube. Waxay ku dhawaaqday in adeegyo tarjumaada isdaba jooogga ah loogu heli karo luuqada Isbaanishka, Haitian Creole, Cabo Verdean, Vietnamese, Cantonese, Mandarin iyo Luuqadda Dhagoolaha Mareykanka (ASL) waxa

ayna bixisay tilmaamooyin kusaabsan sida loo helo tarjumaada isdaba jooogga ah iyadoo la beddelayo kanaalka Zoom. Dukumiintiyada laturjumay ee shirka ayaa lagu daabacay www.bostonpublicschools.org/schoolcommittee inta uusan shirka bilaaban kahor.

Marwo Robinson waxay sharaxday sababta oo ah midani waa kulan gaar ah oo Guddiga Dugsiga, diirada saaraya kaliya qiimaynta Kormeeraha Guud, ma jiri doono wakhti faalooyin dadweyne. Waxay sheegtay inay jiri doonto fursad ay dadweynuhu uga faaloodaan qiimaynta Kormeeraha guud ee shirka guddiga caadiga ah ee soo socda ee Agoosto 30, wakhtigaas oo Guddigu soo bandhigi doono qiimaynta guud ee Kormeeraha Guud ee Sanad dugsiyeedka 2022-23.

WARBIXIN

Qiimaynta Shakhsi ahaaneed ee Kormeeraha guud Skipper SY 2022-23 - Marwo Robinson ayaa si kooban u sharaxday habka qiimaynta kormeeraha. Waxaa ka mid ah mas'uuliyadaha aasaasiga ah ee Guddiga Dugsiga Boston waa shaqaaleysiinta, kormeerka, iyo qiimaynta Kormeeraha guud. Iyadoo Skipper Kormeeraha Guud aanu weli helin sanad buuxa oo hogaaminayso BPS, qandaraaskeedu wuxuu ku baaqayaa in Guddigu sameeyo qiimayn ka hor bilowga sannad dugsiyeedka soo socda.

Waxaa jir afar heer ee qiimaynta:

1. Hadafyada lagu heshiiyay
2. Qiimeyn shakhsi ahaaneed uu sameeyay kormeeraha
3. Qiimaynta xubinta shakhsi ahaaneed
4. Qiimaynta wadar ahaaneed ee ku salaysan qiimaynahas shakhsi ahaaneed oo ay ku xigto codaynta Guddigu qiimaynta.

Iyadoo la raacayo soo bandhigida Kormeeraha guud ee isqiimaynta SY22-23 fiidkan, Guddigu wuxuu qiimayn doonaa waxqabadka Kormeeraha lixdii yool ee ay markii ugu horeysay si cad u soo bandhigtay Oktoobar 2022:

- Mudnaan siinta iyo Dardar gelinta Waxqabadka Waxbarashada
- Xoojinta Helitaanka Waxbarashada Bulsho iyo Shucuur ahaaneed
- Hagaajinta Hawlaha iyo Xaqiijinta Badqabka Ardayga
- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah
- hormarinta xiriirka isgaarsiin ahaaneed ee gudaha iyo dibada ee lala leeyahay qoysaska iyo shaqaalaha
- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

Qiimaynta waxaa loo samayn doonaa si waafaqsan hagitaanka ay bixiso Massachusetts Department of Elementary and Secondary Education (DESE) oo ka kooban afar heerar:

1. Hoggaaminta Waxbaritaanka
2. Maamulka iyo Hawlaha
3. Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada
4. Dhaqan Xirfadeed

Kormeeraha guud ee Skipper wuxuu soo bandhigay qiimeynteeda shakhsi ahaaneed ee SY22-23, iyadoo ku qiimeysay waxqabadkeeda mid kasta oo ka mid ah heerarka afarta heer.

Waxay soo bandhigtay guulaha kooxdeeda qayb kasta oo kamid ah:

Heerka I: Hoggaaminta Waxbaritaanka

- Tacliinta Loo Siman Yahay
- U dhanaanshaha
- Qorshaha Labda Labada luuqad/OMME
- Kuliyada waqtiga hore
- Balaarinta Waxbarashada Farsamada Gacanta (CTE)
- Taageerada Ardayga: Fursadaha Dhalinta iyo Maqnaanshaha Joogtada ah

Heerka II: Maamulka iyo Hawlaha

- Qaabdhismeedka Kooxda: Ku Xigeenada
- Qaabdhismeedka Kooxda: Qaabka Gobolka
- Qorsheynta Tas-hiilaadka
- Xafiiska Maareynta Xaaladda Degdegga/Qorsheynta Badbaadada Dugsiga
- Nidaamyada Isgaarsiinta
- Qandaraasyada Shaqada

Heerka III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada

- Dib u habayntass: Kordhinta Sinaanta, Horumarinta Qoyska iyo Bulshada
- Hagaajinta Rugta Golaha Dugsiga
- Khadka Caawinta Qoyska BPS
- Ballaarinta Kormeerka Waalidka

Heerka IV: Dhaqan Xirfadeed

- Wada Xiriirada Gudaha
- Diiradda Horumarinta Xirfadeed
- Qandaraaska Hogaamiyaha Dugsiga
- Qaab-dhismeedka Kulanka

Kormeeraha guud ayaa sheegay in sanadkii lasoo dhaafay iyada iyo kooxdeedu ay diiradda saareen qiimaynta degmada iyagoo sidoo kale si firfircoon u samaynayey hagaajinta iyo mudnaanta si loo dhiso aasaas adag iyada oo la abuurayo lana xoojinayo nidaamyada iyo qaababka muhiimka ah. Waxay sheegtay in shaqo badan ay u harsan tahay in la qabto, isla markaana geesinnimo, isbedel ah ay suurtagal tahay. Kormeeraha guud ayaa uga mahadceliyey Guddiga taageerada iyo wadashaqeynta ay la garab taagan yihiin.

Kulanka Fogaan Araga ah ee Guddiga Dugsiyada Boston

Zoom

Luuliyo 26, 2023

Dr. Alkins ayaa waydiiyay Kormeeraha guud qeybta mudnaanta la siinayo. Waxay sheegtay in horumarinta qorshaha waxbarashada loo wada dhan yahay ay tahay mudnaanta, marka la eego in ardayda naafada ah la geeyo deegaannada ugu yar ee xaddidan iyo in ardayda luqadaha badan ku hadasha la kordhiyo helitaanka luqadda hooyo. Waxay sheegtay in xoojinta ka qaybgalka qoyska iyo bulshada, nidaamyada taageerada ee heerarka badan leh, iyo nidaamyada hawlgalka iyo qaab-dhismeedyada ay sidoo kale yihiin mudnaanta. Iyadoo laga gudbayo, kooxdeedu waxay sidoo kale diiradda saari doontaa raasamaal aadanaha, maaliyadda, iyo adeegyada cuntada. Kormeeraha guud waxa uu sheegay in ay qorshaynayso inay soo qaadato habka Dr. Karen Mapp ee hawlgelinta dhabta ah ee qoyska.

Marwo Polanco Garcia ayaa aad uga hadashay dardar gelinta Awooda Hogaanka Xagaaga ee Guddigu ka qaybqaatay horaantii bishan. Waxay sheegtay in tababarka, oo ay iska kaashadeen Golaha Dugsiga iyo Harvard Business School/Harvard Graduate School of Education, ay xoojisay mas'uuliyadda ay guddiyada dugsigu ka leeyihiin hagaajinta natiijada ardayda iyo kormeerida kormeeraha. Waxay xustay in degmooyin badan ay wadaagaan caqabado la mid ah kuwa BPS. Ms. Polanco Garcia waxa ay codsatay xogta tirada macalimiinta laba luqad ku hadla, xirfadlayaasha labada luuqadood, iyo shaqaalaha bulshada ee labada luuqadood ku hadla ee hadda ku sugan degmada marka la barbar dhigo markii ugu horeysay ee Kormeeraha Guud uu qaatay doorka.

Mr. Tran ayaa ku amaanay Kormeeraha guud inuu dejiyo dhammaan qandaraasyada shaqada ee weli shaqaynaya. Wuxuu weydiiyey sida degmadu ula xiriirto waalidiinta fursadaha wax ku barashada luuqada hooyo iyo sida degmadu u qorsheyneyso ballaarinta fursadaha latalinta waalidka. Kormeeraha guud wuxuu ka hadlay guusha iyo ballaarinta barnaamijka La-talinta Waalidka ee St. Stephen. Waxay sheegtay in qorshaha waxbarashada loo dhan yahay ee degmadu ay ugu wacan tahay gobolka bisha Agoosto taasoo qayb ka ah Qorshaha Hormarinta Nidaamka (SIP). Waxay sheegtay in waxbarashada loo dhan yahay ay kordhin doonto boqoleyda ardayda naafada ah ee ku sugan deegaanka ugu xaddidan iyo kordhinta boqolleyda ardayda barta luqadaha badan oo leh heer ay helaan luqadda hooyo.

Mudane O'Neill ayaa uga mahadceliyay Kormeeraha guud diiradda iyo hufnaanta ee qiimeynteeda shakhsi ahaaneed. Wuxuu sheegay in uu jeclaan lahaa in ay sii ballaariso talaabooyinka ay qaadayso iyada oo ka jawaabaysa talooyinka Golaha Dugsiyada Magaalada iyo SIP. Kormeeraha guud wuxuu u caddeeyey Mudane O'Neill in iskaashi degmadu la leedahay Franciscan Children’s Hospital ay kaabi doonto, aysan beddeli doonin, Qaabka Caafimaadka Dhaqaneed ee Dhameystiran ee Caafimadka ee degmada ee IBoston Children's Hospital. Mudane O'Neill wuxuu waydiiyay sida degmadu u wanaajin karto isku halaynta GPS kormeerayaasha basaska si loo hubiyo xog sax ah oo dheeri ah. Kormeeraha guud wuxuu sharaxay in qiyaastii 3-4 boqolkiiba kormeerayaasha meelaynta goobta ee **GPS** ee degmada ee 750 basaska ay la kulmaan dhibaatooyin xagga xog ururinta sababo kala duwan awgood iyo in kooxda gaadiidku ay ka shaqaynayaan sidii ay u hagaajin lahaayeen arrimahaas. Mr. O’Neill waxa uu sheegay in uu jeclaan lahaa in xoogga la saaro ka qaybgalka qoyska iyo bulshada marka qorshaha xarumaha la shaaciyo. Waxa uu u hambalyeeyay Kormeeraha guud ee gaadhay go'aamada shaqada. Waxa uu ku dhiirigaliyay maamulaha guud in uu eego shaqada ay degmooyinka kale ee dugsiyadu qabanayaan sida; Charlotte leh nidaamyo caafimaad, Dallas oo leh bulshada ganacsiga maxalliga

ah iyo Long Beach oo leh ururinta khibradda warshadaha. Waxa uu wax ka waydiiyay shaqada degmada ee ku saabsan atacliin loo siman yahay iyo sida ay u kordhin karto fursadaha ardayda iyo in la xiro daldaloolada. Kormeeraha guud wuxuu sheegay inay adeegsanayso shabakadaha gobolka iyo bulshooyinka waxbarashada xirfadleyda ah si ay u hirgeliso ku dhaqanka tacliinta loo siman si joogto ah fasal kasta. Waxay ka hadashay maalgelinta qotoda dheer ee degmadu ku samaysay agabka waxbarasho oo tayo sare leh oo dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ku haboon. Kormeeraha guud wuxuu sheegay inay ku kalsoon tahay in tacliinta loo siman, oo ay weheliso taageerooyinka saxda ah, ay hormarin doonto natiijada tacliinta ee ardayda ayna ka caawin doonto xiritaanka daldaloolada.

Dr. Alkins waxa ay codsatay in Kormeeraha Guud bixiyo jaantus ku xidha aragtideeda wax qabad ee SIP, Golaha Dugsiyada iyo qiyamka Guddiga Dugsiga.
Waxa uu wax ka waydiiyay wakhtiga la qabanayo qoyska iyo bulshada ee la xiriira qorshaha dhismaha. Kormeeraha guud wuxuu sheegay in dayrta, iyada iyo kooxdeedu ay u soo bandhigi doonaan qoraal qabyo ah oo qorshaynta raasamaalka ah guddiga oo ay la socdaan dashboardka xaaladaha txarumaha.

Ms. Robinson ayaa ka hadashay dareenka degdega ah ee dugsiyada qaar ay muujiyeen marka lagu daro u dhanaanshaha. Kormeeraha guud ayaa ka hadlay horumarka ka socda dugsiyada isbedelka oo ay sheegtay in kooxaha isku xirka goboladeeda ay ka shaqaynayaan sidii dugsiyada loo siin lahaa taageero lagu maareeyo isbeddellada ballaaran. Kooxaha shabakadu waxay la shaqaynayaan hogaamiyayaasha dugsiga iyo khabiirada xogta si ay u gaaraan go'aamo xog-waraysi ah oo ay ku dadaalaan horumar joogto ah.

Ms. Robinson ayaa waydiisay Kormeeraha guud waxa ay tahay wax qabadkeeda ugu han weyn sanadka ugu horeeya. Maamulaha guud ayaa sheegay inay ku hanweyn tahay dejinta qandaraasyada shaqada, xasilinta mabaadi'da muhiimka, shaqaaleysiinta heer dugsi iyo heer degmo, iyo kor u qaadida nidaamka kor loogu qaadayo hab waara.

Ms. Robinson waxay dib u eegtay wakhtiga qiimaynta iyadoo ka gudubtay. Dhowrka todobaad ee soo socda, xubin kasta oo ka mid ah Guddiga ayaa qori doonta qiimeyntooda. Dr. Alkins iyo Mr. O'Neill ayaa markaa xogta ku ururin doona hal qiimayn oo kooban oo lagu soo bandhigi doono kulanka Ogosto 30. Gudigu waxa ay u codayn doonaan qiimaynta hawl qabad ee u dambeeya ee Kormeeraha Guud ee Sebteembar 13. Ms. Robinson ayaa u xaqiijisay Mr. Mehta in uu ka qaybqaadan doono nidaamka qiimaynta kormeeraha. Ms. Robinson ayaa u xaqiijisay Mr. Tran in uu iimayl u diri karo qiimayntiisa la dhamaystiray ee Ms. Sullivan iyo Kormeeraha Guud. Ms. Robinson waxay u mahadcelisay Dr. Alkins iyo Mr. O'Neill oo hormuud ka ahaa hawsha.

ARIN CUSUB

Midna.

Kulanka Fogaan Araga ah ee Guddiga Dugsiyada Boston

Zoom

Luuliyo 26, 2023

SOO XIRIDA

La ansixiyay - Qiyaastii 7:55 p.m. Guddigu waxay cod aqlabiyad ah, iyadoo la yeerinayo gudiga, ugu codeeyeen in shirka dib loo dhigo.

Xaqiijinta:

Elizabeth A. Sullivan
Xoghayaha Fulinta